



Federal Republic of Somalia  
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation

WAR-MURTIYEED

**Kulanka Wasiirrada Arrimaha Gudaha heer Federaal, Dowladaha Xubinta ka ah  
Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee Isku-dubaridka Xasilinta  
Qaranka**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 20<sup>ka</sup> Bisha Juun, 2023, waxaa Magaalada Kismaayo ee Xarunta KMG ee Dowlad-Goboleedka Jubaland lagu soo gaba-gabeeyay Shirka Isku-Dubaridka Xasilinta Qaranka oo socday 19<sup>kii</sup> iyo 20<sup>ka</sup> Bisha Juun, 2023.

Kulanka oo ay kasoo qayb-galeen Madax kala duwan oo ay ugu horeeyaan Madaxweynaha Jubaland, Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS, Wasiirrada Arrimaha Gudaha DXDF, Gud. Kuxigeenka Amniga iyo Siyaasadda Maamulka Gobolka Banaadir. Madashaan oo uu hogaan u yahay Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib U heshiisiinta.

Waxaa sidoo kale kasoo qeybgalay shirka Ku xigeenka Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay, mas'uuliyiinta Safaaradaha Ingiriiska, Mareykanka, Norway, Switzerland iyo xubno matalayay ATMIS, Hay'adaha bah-wadaagta la ah Dowladda Soomaaliya ee Arrimaha Xasilinta, oo ay ka mid yihiin UNSOM, IOM, UNICEF, UNDP, USAID-TIS3, UK-ERI iyo NIS Foundation. Waxaa sidoo kale shirka qeyb ka ahaa madax sare iyo masuuliyiin ka socday hay'adaha Dowladda heer Federaal, DXDF, iyo MGB.

Ugu horreyn, shirku wuxuu uga mahadcelinayaa Madaxda iyo Shacabka Jubaland soo dhoweynta iyo martigelinta ay shirka u sameeyeen iyo kaalinta muuqata oo ay ka gaysteen qabsoomidda kulankan.

Marka labaad, waxaa dowlad iyo shacabba mahadcelin balaaran loogu jeedinayaa cid walba oo gacan taageero ah ka gaystay hawlaha xasilinta dalkeena Soomaaliya, gaar

Via Tanzania, 888 Building

Web: [www.moifar.gov.so](http://www.moifar.gov.so) Email: [info@moifar.gov.so](mailto:info@moifar.gov.so) Phone 865929

ahaan, dowladda Norway oo Mashruuc cusub oo loogu magac daray PROSPERIS lagu daahfuray inta uu kulanku socday.

Marka saddexaad, shirku wuxuu bogaadinayaa hawlgallada dib-u-xoraynta ee ciidamada qaranka, kuwa dowlad goboleedyada iyo halgamayaasha shacabku ay ku xoreynayaan degmooyinka gacanta khawaarijta muddo dheer ku jiray iyo hawlaha xasilinta ee halkaas ka socda, iyadoo lagu baaqay in degmooyinka iyo deegaannada harsan laga dul-qaado heeryada khawaarijta.

**Kulanka waxaa ka soo baxay qodobbada soo socda:**

1. Shirka Wuxuu u mahadcelinayaa madaxweynaha Dowladda Jubaland Axmed Maxamed Islaam oo daah furay kulanka Isku dubaridka Xasalinta Qaran.
2. Shirku wuxuu uga mahadcelinayaa ciidamada DFS, ciidamada DXDF iyo ciidamada deegaanka, dadaalooda ku wajahan dib u xoreynta deeganada khawaarijta heystaan.
3. In la xoojiyo gacanna la siiyo hawl-gallada dib-u-xoraynta iyo abaabulka dagaal ee ka dhanka ah Khawaarijta Al-Shabaab oo ka socda Dalka, waxaa sidoo kale loogu baaqay meelaha colaaduhu ka socdaan in shuruud la'aan loo joojiyo oo loo midoobo la dagaallanka Khawaarijta Al-Shabaab.
4. In la adkeeyo lana xoojiyo wada-shaqaynta, wadaagga xogta iyo macluumaadka u dhexeeya hay'adaha dowladda kawada shaqeeya hawlaha xasilinta, gaarsiinta gargaar deg deg ah goobaha dhawaan la xoreeyay oo ay hormuud u yihiin SODMA, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Gargaarka DXDF.
5. Waxaa la isku-booriyay in la dardargeliyo lana xoojiyo adeeg gaarsiinta iyo in si deg-deg ah looga hawl-galo deegaannada la xoreeyay si dadku u dareemaan lahaanshaha Dowladnimo iyo kalsooni-dhiska bulshada iyo dowladooda.
6. Waxaa la soo dhoweeyay dadaallada ay waddo Dowladda Federaalka Soomaaliya ee qeybta ka ah Qorshaha Xasilinta Qaranka iyadoo ay kaalin muuqata kuwada leeyihiin dhammaan daneeyayaasha (DFS, DXDF, MGB iyo Saaxiibbada Caalamka).
7. Shirka waxa uu u aqoonsaday dowlad goboleedyada Hirshabeelle iyo Galmudug inay u yihiin tusaale howl-gallada dib u xoreynta ee khawaarijta looga saarayo

---

Via Tanzania, 888 Building

Web: [www.moifar.gov.so](http://www.moifar.gov.so) Email; [info@moifar.gov.so](mailto:info@moifar.gov.so) Phone 865929





- dalkeenna, waxa uuna shirku ku baaqay in la xaqiijiyo haynta, isu socodka iyo amniga deegaannada la xoreeyay.
8. Waxaa si gaar ah Dowladda Hirsahbeelle iyo bulshadeeda loogu amaanay sida ay ula dagaallameen khawaarijta ayna u muujiyeen geesinnimo iyo adkaysi, waxaana uu shirku ku baaqay in taagero mug leh la gaarsiiyo deegaannada la xureeyay.
  9. In xoogga la saaro wacyigelinta bulshada, ka jawaabidda degdegga ah ee lagu dayactirayo kaabayaasha ay burburiyaan Khawaarijta iyo in dowlad goboleed kasta yeesho qorshe xasilin u gaar ah oo ay ku caddahay arrimaha mudnaanta u leh, kaasoo waafaqsan Istiraatiijiyadda Xasilinta Qaran.
  10. In maalgelinta barnaamijyada xasilinta loo isticmaalo in looga gudbo maamullada KMG ah iyo dhismaha goleyaasha deegaanka rasmiga ah.
  11. In si wadajir ah looga wada-shaqeeyo arrimaha dhisidda golayaasha deegaanka, maamul baahinta iyo xaqiijinta kaalinta haweenku ku leeyihiin geeddi socodka iyo dhismaha dowladaha hoose iyadoo la raacaayo hannaanka Doorashooyinka JFS ee Madasha Wadatashiga Qaranka ku heshiiyeen dhowaan iyo shuruucda dowladaha hoose ee DXDF.
  12. Shirku wuxuu u mahad celinayaa Deeq-bixiyayaasha iyo hay'adaha Caalamiga ah ee taageera Barnaamijka Xasilinta, waxa uuna shirku ku baqayaa in la sameeyo Sanduuqa Xasilinta Qaran loona helo dhaqaale ku filan oo lagu hirgaliyo howlaha xasilinta.
  13. Waxaa la isla gartay qabashada kulanka isku dubaridka Arrimaha Xasilinta Qaran saddexdii biloodba mar, laguna qaadaa dhigo arrimaha hortebinta u leh Xasilinta Dalka, iyo dowladaha hoose, shirkaan kan xigana lagu qabto Dowladda Hirshabelle.
  14. Ugu dammayn waxaa shirka lagu bogaadiyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS doorkeeda muhiimka ah ee isku-dubaridka hawlaha Xasilinta Dalka.

**=DHAMMAAD=**





**Saxiixayaasha War-murtiyeedka Madasha.**

1. Ahmed Macallin Fiqi Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha , Federaalka iyo Dib u Heshiisinta ee XFS 

2. Maxamed Ahmed Diiriye (Yabooh) Guddoomiye Ku xigeenka Amniga iyo Siyaasadda G. Banaadir 

2. Cabdiraxmaan Daahir Guure (Karoore) Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Dowladadaha Hoose 

3. Maxamed Ibrahim Ogle Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaaleynta iyo Dib u Heshiinta. 

4. C/laahi Xaaji Xasan Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Dib u Heshiinta 

5. Cabdi Maxamed Jaamac (Waayeel) Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaaleynta iyo Dib u Heshiisiinta 